

# Fahamka Diiwaanka Tallaalka ee MIIC

## HAGAHAA ISTICMAALAAHA EE LOOGU TALAGALAY DADWEYNAHA

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka diiwaanka tallaalka ee adiga ama qoyskaaga, booqo [Find My Immunization Record](http://www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html) (www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html).

## Diiwaanka Tallaalka ee MIIC

Diiwaanka tallaalka ee MIIC ee laguu soo diray waxa uu ka kooban yahay dhammaan macluumaadka tallaalka ee MIIC ay haysay wakhtigii la codsado. Waxa jira afar qaybood oo diiwaanka ku jira: Macluumaadka Dadweynaha, Taariikhda Tallaalada, Faallooyinka Tallaalada, iyo Tallaalka Lagugula Taliyay.

## Macluumaadka Dadweynaha

Xagga sare ee diiwaanka, waxaad arki doontaa macluumaadka aqoonsiga oo ay ku jiraan magacaaga, taariikhda dhalashada, da'da (xilligii warbixinta la soo saaray), jinsiga iyo aqoonsiga MIIC. Aqoonsigaaga MIIC waa aqoonsigaaga gaarka ah ee gudaha MIIC.

Generated 12/02/2021 by MIIC



**Minnesota Immunization Report**

**Name (L, F)** MOUSE, MICKEY MIIC ID: 7957558

Date of Birth: 01/08/2021 Age: 9 years, 10 months, 24 days Gender: F Org ID: N/A

This report contains immunizations submitted to MIIC. Provider participation in MIIC is voluntary. Please check with your healthcare provider if you notice missing vaccinations. This report should be acceptable to use as proof of immunization for child care, school, and other purposes.

## Taariikhda Tallaalka

Qaybta "Taariikhda Tallaalka" ee diiwaanku waxay muujinaysaa taariikhdaada tallaalka. Waxaa ka mid ah dhammaan tallaallada ay soo gudbiyaan bixiyeyaasha MIIC la wadaaga xogta tallaalka. Liiska magacyada tallaalada iyo soo gaabintooda, ka eeg Shaxda 1 ee dhammaadka dukumeentigan.

Immunization History			
Vaccine Type	Dose Number	Date	Vaccine (Trade Name)
HepA	Not Valid	10/10/2010	HepA, unspecified formulation
MMR	1 of 2	11/10/2015	MMR

Warbixintan waxaa ku jira dhowr qaybood oo macluumaad ah:

- Nooca tallaalka: Magaca nooca tallaalka (tusaale, "hargab").

- Lambarka Qiyaasta Dhooska: Meesha uu dhoosku kaga beeganyahay taxane dhowr ah oo nooca tallaal cayiman ah. Tallaalada qaarkood waxay u baahan yihiin dhoosyo badan si loo kordhiyo ka ilaalintaada cudurka. Lambarka liiska ku qoran wuxuu sharxayaa qiyaasta dhooska daawada ee ku jirta taxanaha. Tusaale ahaan, "1 of 2" macnaheedu waa qiyaasta dhooska koowaad ee taxane laba dhoos ah.

**Xusuusin:** Qiyaasta daawada (dhooska) ee COVID-19 waxay muujin kartaa "3 of 2" ama "2 of 1." Tani waxay muujinaysaa in uu jiro dhoos dheeraad ah ama xoojiye.

- Taariikhda: Taariikhda aad qaadatay tallaalka.
- Tallaalka (Magaca Ganacsiga): Magaca ganacsiga ee tallaalka aad qaadatay. Tallaalada qaarkood waxay leeyihiin noocyo kala duwan oo badeeco ah (tusaale: "FLUAD Quadrivalent," "Fluzone trivalent," "Fluzone quad high pfree," "FluMist," iwm.).

### Tallaal "Aan Ansax ahayn"

Tallaalada qaar ayaa laga yaabaa inay ku qoranatahay "Not Valid" ("Aan ansax ahayn") qaybta qiyaasta daawada. Tani waxay dhacdaa marka tallaalku uusan raacin heerarka Xarunta Xakamaynta Cudurada (CDC) Guddiga La-talinta ee Dhaqannada Tallaalka (ACIP) Talooyinka iyo Tilmaamaha Tallaalka (<http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/acip-recs/>). Tallaalka waxaa lagu calaamadin karaa in uu yahay mid aan sax ahayn haddii:

- Tallaalka haddii la bixiyay kahor ama kadib da'da lagu taliyey.
- Tallaalka waxaa qofka la siiyay xilli aad ugu dhow dhoos kale oo taxane ah (muddada u dhaxaysa dhooska ayaa aad u gaabnayd).
- Tallaalku wuxuu ahaa tallaal nool oo la bixiyay xilli aad ugu dhow tallaal kale oo nool (in isaga dhow 28 maalmood).

### Faallooyinka tallaalka

Qaybtan warbixintu waxay ku tusinaysa faallooyinka uu galiyay adeeg bixiyahaagu. Faallooyinku waxay tilmaami karaan dhowr waxyaalood, sida difaaca dabiiciga ah ee cudurrada (tusaale, baaritaanka dhiiga ayaa muujinaya inaad dabiici ahaan iska difaaci karto Cagaarshowga A), bukaanku ayaa wuxuu sheegay mar hore in uu cudurku ku dhacay (tusaale, waxaa ku dhacay mar hore busbuska/furuqa halkii aad tallaalka ka qaadan lahayd. ), ka dhaafitaanka caafimaadka (tusaale, dhakhtarkaa ayaa wuxuu kuu sheegay inaad qaadanaynin tallaal gaar ah), iyo diidmada tallaalka. Faallo badan ayaa lagu qori karaa hal diiwaan.

**Immunization Comments**

Comment	Date
Immunity: Titer/MD Dx Hepatitis A	10/01/2010
Pt Report Hx of Varicella/Chicken Pox	09/15/2011
Medical exemption: Influenza	12/01/2019

**Talaalka lagugula taliyay**

Qaybtan diiwaankaagu waxay ku tusaysaa tallaalada aad u baahan doonto mustaqbalka. Qaybtani waxay kaa caawin kartaa inaad tallaalada ballan uga samaysato bixiyahaaga si aad u hubiso inaad la socoto taariikhda.

MIIC waxay isticmaashaa jadwalka tallaalka ee ay dejisay CDC si ay u aragto in ay kuu dhammaystiranyihiin tallaaladaadu. Taariikhda lagu taliyey waa marka ay tahay in lagu siiyo tallaalka xiga ee kooxda tallaalada.

**Immunizations Recommended**

Vaccine	Recommended Date
COVID-19	04/25/2021
DTP/aP	04/06/2017
HepA	04/25/2017
HepB	COMPLETE
Hib	COMPLETE
Influenza	07/01/2021
MMR	12/02/2020
MenB	04/25/2032
Polio	04/25/2020
Rotavirus	MAX AGE EXCEEDED
Td/Tdap	04/25/2023
Varicella	IMMUNE

**Su'aalaha badanaa la isweydiyo**

**Su'aal: Warbixintayda Tallaalada MIIC ma muujinayso dhammaan diiwaanada tallaaladayda.**

Jawaab: Maadaama MIIC la sameeyay 2002, dad badan oo qaangaar ah ayaan diiwaankooda tallaalka carruurnimadu ayna ugu jirin MIIC. Sidoo kale, haddii lagugu tallaalay meel ka baxsan Minnesota, macluumaadkaas waxaa laga yaabaa in aan laga helin MIIC. Macluumaadka tallaalka si toos ah loogama soo wareejinayo gobol ilaa gobol kale marka aad guurto. Ka tixraac Xiriirada CDC ee Diiwaanada Tallaalka ([www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/contacts-locate-records.html#state](http://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/contacts-locate-records.html#state)) si aad u hesho diiwaanada tallaalka ee gobolada kale.

Haddii aad haysato caddaynta tallaalka, booqo “Find My Immunization Record” ([www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html](http://www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html)) si aad u hesho tillaabooyinka ku saabsan sida macluumaadkaas loogu daro MIIC ama la xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga. Wixii talo caafimaad ah ee ku saabsan tallaalkada, la xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga.

### Su'aal: MIIC waxay ku talisay MMR, HepB, Varicella, HepA laakiin waxaan ahay qof qaangaadh ah

Jawaab: MMR, HepB, Varicella, iyo HepA waa tallaalkada xilliga carruurnimada lagu taliyey. Sababtoo ah dad badan oo qaangaar ah ayaan diiwaankooda tallaalka carruurnimada ku haysan MIIC, MIIC waxaa laga yaabaa in ay tusinayso in aad ka daahsantahay tallaalka adiga oo aan ka daahsanayn. Wixii talo caafimaad ah ee ku saabsan tallaalkada, la xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga.

### Sa'aal: Waxaa la igula taliyay Td/Tdap laakiin mid ayaan qaatay 10kii sano ee la soo dhaafay

Jawaab: Tdap waa tallaalka ka difaaca teetanada, gowracatada, iyo xiiq-dheerta ee dhalinyarada iyo dadka qaangaadhka ah. DTaP waa nooca carruurta. Haddii dadku aanay helin tallaalkada taxanaha ah ee DTaP ee buuxa carruurnimadoodii, taxane tallaallo badan oo Tdap ah ayaa lagula talinayaa. Sababtoo ah dad badan oo qaangaar ah ayaan diiwaankooda DTaP ee carruurnimada ku haysan MIIC, waxaa laga yaabaa in ay tusinayso in aad ka daahsantahay tallaalka adiga oo aad ka daahsanayn. Wixii talo caafimaad ah ee ku saabsan tallaalkada, la xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga.

## Shaxda 1. Soo gaabinta iyo Magacyada Tallaalka

Vaccine Abbreviation	Magaca Tallaalka
Adeno	Adenovirus
Adjuvant	Adjuvant
Anthrax	Kudka
BCG	Bacille Calmette-Guerin (Tuberculosis)

FAHAMKA DIIWAANKA TALAALKA EE MIIC

Vaccine Abbreviation	Magaca Tallaalka
Cholera	Daacuunka
Dengue Fever	Qandhada Dengue
Diphtheria	Gawracatada
DTP/aP	Gawracatada, Teetanada, Acellular Pertussis
Ebola	Ebola Zaire
Encephalitis	Caabuqa maskaxda
H1N1 Novel Flu	H1N1-09 Hargabka Cusub
Hantavirus	Hantavirus
HepA	Cagaarshowga A
HepB	Cagaarshowga B
Hib	Hargabka Haemophilus Nooca B
HPV	Fayraska Human papilloma virus
Ig	Immune Globulin
Influenza	Hargabka
Lyme	Lyme
Measles	Fayraska Jadeecada
MMR	Jadeeco, Qaamo-qashiir, busbuska
MenB	Meningococcal B
MenACWY	Meningococcal conjugate
Meninge-poly	Meningococcal polysaccharide
Mumps	Fayraska Qaamo-qashiirta
Plague	Plague

Vaccine Abbreviation	Magaca Tallaalka
Pneumo-conj	Pneumonia Conjugate
Pneumo-poly	Pneumonia Polysaccharide
Polio	Poliomyelitis
Rabies	Waraabowga
Rotavirus	Rotavirus
RSVIG	Fayraska Neefmareenka Respiratory Syncytial Virus IG
Rubella	Fayraska Jadeecada Rubella
COVID-19	SARS-COV-2 (COVID-19)
Tetanus	Teetanada
Td/Tdap	Teetanada, Gawracatada, Acellular Pertussis
Tick-borne encephalitis	Caabuqa maskaxda Shilinta ka dhash
Typhoid	Tiifowga
Typhus	Tiifowga
Smallpox	Furuqa
Varicella	Busbus/hablabaas
Yellow Fever	Qandhada Yellow Fever
Zoster/shingles	Tallaalka Zoster, nool

Minnesota Department of Health

PO Box 64975

St. Paul, MN 55164

651-201-5207

[health.miichelp@state.mn.us](mailto:health.miichelp@state.mn.us)

[www.health.state.mn.us/people/immunize/miic](http://www.health.state.mn.us/people/immunize/miic)

01/11/2022 (Somali)

*Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, wac: 651-201-5207*